Bundesamt
für Justiz

# Ogeysiin: Anfac loogu talogalay dhibanayaasha ku sugan xaaladaha ad-adag oo si xadgudub ah loogu geeystay.

## Horudhac

Waxaa qeeymo aasaasi u ah Bulshada (oo ka kooban dad kala isir ah ee wada nool) iyo dawlada howlaheeda gaarka ah in qof kasto xoriyadiisa la ilaaliyo oo laga difaaco xadgudub nooc walba ah, sida fashiistanimada, yahuud-nacaybka ama islaam nacaybka. Sidaas darteed baarlamaanka jarmalka waxuu biilka sanadlaha ee dawlada ku daray lacag anfac ah oo loogu talogalay dhibanayaasha ku sugan xaaladaha ad-adag oo lagu xadgudbay. Anfacan caawinaad waa mid xaquuq aan loo lahayn laakiin laysu ogolaan karo, waa isgarab taag ay dawladu ku caawinayso muwaadiniinta dhibaataysan. Waxay isla markaa si toos ah ka turjumaysaa ka warhaynta dhibaatooyinka noocan ah. Go´aamada waxaa loo tixgelinayaa mid-mid ku salaysan bani´aadminimo ay dawladu caawinaad degdeg ah u bixin karto.

## Shuruudaha laysugu ogolaado iyo sida loo xisaabiyo

Go´aanka ogolaashaha iyo xisaabinta ee anfaca caawinaada waxay ku qeexan tahay *shuruudaha ogolaashaha.*

Anfaca waxaa laysu ogolaadaa oo la bixiyaa *hal-mar* iyadoo lacag ah.

*Weerarka xadgudubka ah* waxaa si khaas ah uga mid ah kuwa fashiistaha, ajnabi nacaybka, yahuud-nacaybka, islaam-nacaybka ama kuwa shuuciga ka socda ee gacan ka hadal ku dhaqma. Weerarku waxaa kale uu noqon karaa hanjabaad culus ama meel ka dhac jabinaysa bani-aadamka karaamadiisa.

Anfaca caawinida waxaa loo bixiyaa xaalmarin ah dhaawaca jirka loo geeystay ama xaalimarin guud ee lagu dhawaacay qofka shaqsiyadiisa. Anfaca waxyaalaha lagu xisaabiyo waxuu noqon karaa masaariif dhibka haqab tira iyo haqab-tir ku saabsan dhibaatooyinka qofka ka horistaaga inuu shaqaysto*. Qasaare hanti looguma talogelinin in lagu haqab tiro caawinada anfaca dhibanayaasha, sidaas darteed kuma jirto liiska anfaca dhibanayaasha*.

*Arjiga waxaa xaq u leh* xitaa ehelka dhibanayaasha iyo gargaareyaashooda, gargaareyaashu waa dadka dhibaato caafimaad kasoo gaartay iyagoo caawinaaya dhibanayaasha lagu soo xadgudbay oo naftooda halis geliyay.

Anfaca caawinaada marxalada adag waxaa la bixiyaa oo keliya *hadii ay jirto cadayn* muujinaysa in dhibanaha *sabab* cunsuriyeed ama mid nacyb dartiisa ah loo weeraray. Sidaas darteed waxaa muhiim inaad arjigaaga ku sheegtid waxa caydnaya in dhibaatada laguu geeystay ay ahayd mid cunsuriyeed ama mid nacayb ah. Foomka arjiga lambarka IV waxaa loogu talo galay inaad waxii cadayn ah ku qortid.Waxaa kaloo kiiska caawinaaya oo u muhiim ah inaad xafiiska federaalka ee cadaalada (Bundesamt für Justiz) la socod siisid lambarka ama astaanta feelka ee garyaqaanada dawllada ku siin doonaan arjiga markaad dhiibtid kadib, si arjigaaga si deg-deg ah looga go´aan gaaro.

Si Anfaca caawinaada go´aan looga gaaro inuu dhibanaha kaalmo uu helaayo iyo inta ay la´egtahay kaalmadu lama tixgeliyo sharuudaha ogolaashaha oo keliya ee waxaa kale oo la tixgeliyaa inuu dhibanaha si dhaqso ah magdhow uga heli karo qofka dhibaateeyay inuu awoodo inuu dhibanaha abaal marin karo si degdeg ah.

Anfaca caawinaada waxaa kaliya oo la bixiyaa hadii *arji* lagu dalbado. Sii balaarinta maaliyada dawlada ee sanadkii 2010 ee la xiriirta xadgudubka nooc walba leh waxaa loogu talogalay xadgudubka fashiistaha iyo xadgudub nooc walba oo waqtiyo kala duwan leh. Anfaca caawinaada dhibaneyaasha ee ku saabsan *xadgudubka* cunsuriyada waxaa gabi ahaan kaalmo la siinayaa dhibanayaasha la dhibaateeyay waxii ka dambeeyay **1. Janaayo 1999**. Anfaca caawinaada dhibanayaasha ee ku saabsan *xadgudubyada* kale waxaa gabi ahaan kaalmo la siinayaa dhibanayaasha la dhibaateeyay wax ka dambeeyay **1. Janaayo 2010** (Waxaa hirgalay sii balaarinta maaliyada dawlada ee la xariira xadgudubyada kale duwan).

## Halkee baa loo dirayaa arjiga?

Arjiga ogolaashaha Anfaca caawinaada waa inaad si qoraal ah ugu hagaajisaa:

**Bundesamt für Justiz**
**Referat III 2**
**53094 Bonn.**

Dalbashada arjiga waa inaad u adeegsataa *foomka dawlada* ee loogu talogalay, hadii aad soo waydiisatid waa laguu soo dirayaa. Waxaa kale oo aad foomka ka heli kartaa bogga interneetka www.bundesjustizamt.de .

Fadlan arjiga u buuxi *si miyir* leh oo *dhamaystarin*. Taasi waxay aad inoogu fududaynaysaa ka shaqaynta arjigaaga.

Waa muhiim inaad waraaqaha dhaqtarkaaga arjiga soo raacisid si loo qiyaaso anfaca caawinaada lagu siinaayo. Si deg-deg ah in looga go´aan gaaro arjigaaga waxaa iyadana muhiim ah inaad waraaqo hore oo lagu xukumay qofkii dhibaatada kugu sameeyay lasoo raaciyo.

Qofka kasto oo arji dalbanaaya waa inuu foom isaga u gaar ah soo buuxiyaa oo soo diraa isaga oo saxiixay ama qofka sida rasmiga ah ooga wakiilka ah oo soo saxiixay foomka.

Wargelin: Arji dalbadayaasha aan qaan gaarin waxaa looga baahan yahay labada qof ee ka musuulka ah inay ajiga soo saxiixaan. Hadii uu masuuliyada waalid kaliya leeyahayna waxaa ku filan inuu isaga ama iyada soo saxiixo /saxiixdo, isagoo/iyadoo isla markaa ku baaqaya/baaqaysa inuu masuulka keligi leeyahay/leedahay.

Sidaas darteed waxaa lagaa codsanaayaa hadii aaadan ahayn waalidka ilmaha aanan qaan gaarin inoo soo dir warqada sharciyaysan ee masuuliyada ilmahaas xaqa kuu siinaysa adigoo wakiilanaaya garyaqaan.

**Ku wareejinta xuquuqdaada ku saabsan dhibaato haqabtirkaaga ee hayáda federaaliga ee cadaalada**

Arjigaan waxaa loogu talo galay magdhow ama haqabtir ku saabsan dhibaatada la geeystay, khaas ahaan ruuxii dhibaatada geeystay in lagu wareejiyo hay´ada cadaalada, hadii anfac caawinaad ah la bixinaayo. Ku wareejinta waa lagama maarmaan, sababtoo ah anfaca caawinaada caadi ahaan laguma daro lacag kale sida qasaare celin ama lacag xanuun tirid ah. Sababtoo ah ulajeedada anafaca caawinaada waxaa ka mid ah in la hubiyo inuu dhibanaha marnaba caawinaad la´aan ku dhicin, xitaa hadii uu dambiilaha ama kii dhibka geystay uusan lacag haysan. Dawlada baa kiiska la wareegaysa oo dambiilaha lacagta ka bixinaysa hadii uusan waxba bixin karin, si ay waqti dambe dambiilaha lacagta ooga soo ceshato.

Sidaas darteed fadlan ogoow inaad anfaca caawinaad lagu siiyay darteed inaan laguu ogolayn inaad dambiilaha lacag kale ka qaadato ama aadan ku dacweyn inuu dhibaatada uu kuu geystay kaa haqab tiro.

Baaqa ku wareejinta waxuu ka kooban yahay xaquuqda maxkamadaha laysaga dhacsado iyo tan aan maxakamadaha laysula tegin. Taas kasoke ku wareejinta waxaa kale oo ka mid ah lacagaha lagaaga ogolaado dacwooyinka maxkamadaha ay garyaqaanada dawlada dalbadaan oo dambiilaha lagu xukumo. Dacwadaahaas oo qaarkood lagu dabaqo kuwa dhibanaha.

Hadii uu dambiilaha lacag ku siiyo waxaa kugu waajib ah inaad lacagtaas aad u gudbisid hay´ada cadaalada oo ku siisay anfaca caawinaad. Haddi aad taas yeeli waydo waxaa caadi ahaan dib lagaaga soo celin doonaa lacagtii anfaca caawinaad ee lagu siiyay.

Wargelin: Hadii ay dhacdo in dacwada garyaqaanada dawlada oo lagu dabaqay dacwada dhibanaha natiijadeeda in dambiilaha loo xukumo lacag ka badan tii dhibanaha anfac caawinaad ahaan loo siiyay, waxaa ku waajib ah oo keliya inuu hay´ada cadaalada ku wareejiyo lacagtii horay loo siiyay, waxii dheeraad ka ah wuu ceshan karaa. Taasi waxay ku qeexan tahay nidaamka cawinaada loogu talo galay u gargaarka deg-dega ah ee dhibanayaasha.

Waxaanan ku wareejinta ka mid ahayn lacagaha magdhowga ama xanuun tirida oo qofkale sharci ahaan dhibanaha xaq ugu siiyo.

**Halkaan waxad ku weydiin kartaa su´aalaha ku saabsan arjiga iyo qaabka golaashaha**

Ma su´aalo baad ka qabtaa arjiga ama ma shaki baa kaaga jira inaad anfac caawinaad ah heli karaysid? Waxaa raali lagaaga yahay inaad arimahan hayáda cadaalada kala xiriirtid:

**Tel.: +49 228 99 410–5288**
**+49 228 99 410–5790**
**E-Mail: opferhilfe@bfj.bund.de**